



Soomaaliya waa dal oomane-u-eke ilaa dhul oomane ah isugu jira, kaas oo wax ka yar 29% dadweynaha dalka ay heli karaan biyo ammaan ah. Degaamada miyiga ah tiradan waxaa ay noqotaa ilaa 4%¹. Abaaro soo noqnoqda, oo uu weheliyo iskahorimaad dabadheer ayaa baabi'iyey hababkii soo-jireenka ahaa ee ay dadku ku noolaan jireen, oo baabi'iyeyna dhammaan kheyraadkii/hantidii la haystey, taas oo ay ka mid tahay kartidii ay bulshadu u lahayd in ay xalal hesho. Goobaha biyaha laga helo ee tirada yar ayaa xaaladdoodu ay liidataa oo aan si fududna aaney dadku u wada gaari karin, waxaa aad u yar oo dhif ah tas-hiilaad lagu keydiyo ama lagu daweeyo biyaha waxaana jirta in tartanka weyn ee loogu jiro biyaha uu uga sii darey iskahorimaadyada. Gaaritaanka biyuhu waxaa uu saameeyaa dhammaan waaxaha, sida caafimaadka, waxbarashada, ilaalinta iyo maciishadda. Tusaale ahaan biyaha laga soo dhaansado ceelasha badanaaba waa kuwo faddareysan, kuwaas oo sababa in ay dillaacaan cudurrada biyaha ka dhasha, sida daacuunka iyo shubanka. Tusaale kale waa haweenka iyo gabdhaha ku khasbanaada in ay maalin kasta masaafo dheer lugeeyaan si ay biyo u soo arooraan, sidaa daraaddeedna ku waaya fursado waxbarasho oo sidoo kalena u beylahsan in waddada dhibaato ama kufsi loogu geysto. Intaa waxaa dheer, qoysaska reer miyiga ah, gaar ahaan kuwa cayrta ah, ayaa si sii kordheysa ugu soo guuraya degaamada magaalooyinka iyaga oo doonaya in ay adeegyo helaan, taas oo abuureysa xaalado ay dhacaan iskahorimaadyo kheyraadka yar la isku haysto.

Dadaalka CISP ee biyaha iyo fayadhowrka

CISP waxa waxqabadyadeeda waaxda Biyaha iyo Fayadhowrka ay Soomaaliya ka bilowdey sanadkii 2001kii. Tan iyo waqtigaa, CISP waxaa ay si joogto ah wax uga qabaneysay baahiyaha bulshooyinka reer miyiga ah ay u qabaan in ay helaan biyo ammaan ah, iyada oo dhiseysa oo dayactireysana kaabayaasha, iyo iyada oo dhiseysa kartida lagu daweeyo laguna maareeyo biyaha.



Khariidadda waxqabadka biyaha iyo fayadhowrka ee CISP



> Click on the map

¹USAID 2007